

**MUSHARIXIINTA XILKA MADAXWEYNAHA & MADAXWEYNE-KU-XIGEENKA PUNTLAND  
GO'AAN WADAREED**

**Ku:** Issimadda Puntland

**Og:** Cidii ay khuseyso

Annagoo eegeyna danta shacabka, dalka iyo dadka Puntland,

Annagoo qaadaneyna mas'uuliyadeena taariikheed ee ku aadan khilaafka xoogan ee ka jira doorashooyinka Dowladda Puntland sannadka 2014,

Annagoo tixgelineynaa imaatinka issimaddii Puntland oo uu ugu dambeeyey Boqor Burhan Boqor Muuse

Annagoo dooneyna in ay dhacdo doorasho xalaal iyo cadaalad ku dhisan,

**Waxaan isla gaarney:**

1. In aan mas'uuliyadda khilaafkii noo dhaxeeyey annaga iyo madaxweynaha aan ku wareejinay Issimadda Soo-jireenka ah ee Puntland.
2. In aan dooneyno in aan helno doorasho xalaal ah oo lagu kalsoonaan karo dhinac walba.
3. In aan ku ogolaano Guddiga Khilaafaadka labada shardi ee hoos ku qoran:
  - a. In xulasha Parlamaanka 2013 marjic looga dhigo issimaddii aasaasey Puntland 1998
  - b. In wixii khilafaad ah oo ka soo baxa xulushada Baarlamaanka 2013 loo soo gudbiyo issimaddii marjica u ahaa doorashdii 2008 sida ku cad lifaaqa, ayna go'aanka kama-dambeysta ah iyagu leeyihiin.
4. Waxaan soo jeedineynaa in lala xiriiro oo la casumo ismadda ka maqan shirka ah ee soo-jireenka ah ee Sool iyo Ceyn.

Waxaan ku wareejinaynaa mas'uuliyadda habsami-u-socodka doorashadda guud ee Puntland 2014 Issimadda soo-jireenka ah ee Puntland oo waligood marjic u ahaa doorashooyinkii hore e Puntland.

Arrinta Amniga doorashooyinka in lagu ixtiraamo loona madaxbaneeyo Taliyaha Ciidanka Daraawiishta Puntland, ahna mas'uulka amniga doorashooyinka General Siciid Maxamed Xirsi (Siciid dheere) sidii lagu heshiiyey.

